Waxbarashada barbaarinta,hogaaminta caruurta, iyo maaweelida wakhtiyada friaaqada ah

Madoonaysaa in aad dad wadashaqeysiin?
Madoonaysaa in aad waxbarasho siisid, dhalinyarada,iyo dadka waaweyn wakhtiga ay firaaqada ay yihiin waxqabad xiiso leh?
Madoonaysaa sidii aad u diyaarin laheyd , islamarkaana aad u hogaamin laheyd hawl qabad xiiso leh oo isla markaana dadka ay isbedlo horumar ah ay ku gaadhikaraan?
Madoonaysaa inta aad waxabarashada dugsiga sare aad ku jirtid in aad is tijaabiso in aad shaqeysan karaysid?
Madoonaysaa in aad waxbarashadaada aad sii wadatid kadib marka aad dugsiga sare aad dhameysid?
Sidaas daraadeed waxbarashadan caruurta iyo maweelitaanka iyo hogaamintu waa mid adiga kugu haboon.

Inkastoo loogu magac daray waxbarashadan ”waxbarashadan caruurta iyo maweelitaanka iyo hogaaminta” waxa aad barandoontaa hablashaqeynta dadka, ku waas oo da´ahooduna kaladuwanaankaraan. Waxa laga yaabaa in aad jeceshahay in dadka waa weyn aad ku abuurtid noloshooda waxyaabo aad u xiiso geliya ama ay jecleystaan, ama aad hogamisid dadka qaaarkood ee naafada ah. Haddaba shaqooyin wax qabad koodu u yahay sidan waxa aad ka heleysaa wax barashadan”. Waxbarashadan caruurta iyo maweelitaanka iyo hogaminta”

In aad shaqeysid ama waxbarashadaada wadatid.

Waxbarashadan caruurta iyo maweelitaanka iyo hogaaminta má aha diyaar garow xirfad toos ah. Si hadaba aad shaqo ugu heshid xirfadan aad xisaha aad u heysid , waxa ah in aad wax barasho dheeraad ah aad sii qaadatid, taas oo noqon karta mid jaamacadeed ama in aad geshid dugsiyada xirfadaha lagubarto.

Shaqooyinka aad helikaraysid.

Mark aad kabaxdid Waxbarashadan caruurta iyo maweelitaanka iyo hogaaminta waxa aad markaa aad leedahay aqoon fiican oo bilaw ah, oo markaa aad u soo bandhigi kareysid wax yaale kaladuwan oo ay dadku xiiseenayaan.haddii aad doonaysid in aad wax barashadaada aad sii wadatid waxa aad heysataa fursado balaadhan oo kala duwan.Waxaad tusaale ahaan noqonkaraysaa, qof aas-aaskiisu aqooneed uu dhisan yahay ,markaana ka shaqeynkara sida meelaha lagu dabaasho, ama garoomada lagu cayaaro.ama in aad noqotid qofka hogaamiya xanaaneeyana caruurta, gacanyare arday, kalkaaliye macalin, macalin caadi ah, askari, ilaaliye, ilaaliye xabsi, dhakhtarka cilminafsiga, maamulaha isboortiga iyo cayaaraha,tababaraha cayaaraha,gacanyare bulshada cawiya, macalinka isbootiga, waxaad kaloo aad u shaqeyn kareysaa hayadaha samafalka,haddii aad wax barashadaadana aad sii wadatid waxaad ka shaqeynkareysaa kadib dalxiiska.

Waxbarashada guud waxa ay ka koobantahay.

Waxbarashadan caruurta iyo maweelitaanka iyo hogaamintu waxay ka koobantahay casharo.Casharada qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganayasa dugsigasare ey qaatan casharadaas. Waxaa jira laakin casharo kale oo gaar ah una gaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashadan Waxaa intaas sooraaca in ay jiraan casharo kale oo aad adigu gooni aad u doorankartid.

Labada takhasuusood ee guudna waxa ay kala yihiin.

- Habka waxbaritaanka iyo bulsho lashaqeenta- haddii aad doonaysid in aad ku takhasuustid caruurta iyo dhalinyarada habkii aad wax u barilaheeyd ama koritaankoodaba, ama doonaysid in aad baratid sida bulshada loocaawiyo, dadkaas oo ah da´doodu kaladuwanaankaraan.
- Mada-daalo- haddii aad doonaysid in aad ku takhasuustid dhaqamada, iyo mada-dadaalooyinka isla markaana jecel in uu dhalinyarada hogaamiyo wax yaalo farabadan oo xiiso lehna u sameeya

Xidhiidhka suuqa shaqada.

Waxbarashadan caruurta iyo maweelitaanka iyo hogaaminta waxaad wax ka bedeli kareysaa kunakordhin kareysaa wax barashadaada.sidaas darteed waxaad tababar aad ku sameeynkareysaa naftaada sidii ay masuuliyad ay u qaadi laheyd, iyo sidii aad qorsho maal meed aad u sameeyn laheyd.Waxaad kaloo aad xidhiidh aad layeelandoonta dunida inteeda kale ee ka baxsan iskuulka.waxaa suur toobi kareysa in uu iskuulku iyo ururo ay wada shaeeyn dhexmarto, marka hore waxaa laga yaabaa in aad baratid maado ama waxbarasho gaar ah, kadibna aad tababar xirfadeed aad ku sameysid iskuulka, markaas kadibna aad mashruucyadii aad tababarka aad ku sameysay iskuulka aad ku fulisid isaga oo dhameeystiran goobaha ururada.

Marka aad ku jirtid wax barashadaada dugsiga sare waxaad sameen doontaa 15 isbuuc oo dababar xirfadeed iyo mid aqoon kororsi ah.(APU).Inta aad waxbara shada aad ku jirtidna waxa aad sameyndoonta hal ama laba dababaradood oo xirfadeed ah, kaas oo aad tijaabo aad ku sameynaysid aqoontaada iyo xirfadaadaba si hagaagsan.Waana habka u wanaagsan ee aad dad ku barankartid, xidhiidhna aad ku yeelan kartid,xidhiidhkaas oo aad markale aad kaga faa ideeysankartid haddii aad is tiraahdid shaqo raadso mustaqbalka.haddii aad doonaysid in aad tababar xirfadeed aad kusameysid dibada, waxaa suurtagal noqonkarta in aad heshid oo aad debeda tababar ku sameysid

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Sanadihii udanbeeyey ardeydii dhigatay waxbarashadan caruurta iyo maweelitaanka waxa ay sii wateen wax barashadoodii ilaa iyo heer jaamacadeed kadib markii ay dugsiga sare ay kabaxeen. Ardaybadan ayaana noqtay macalimiin caadiya iyo macalimiinta xanaanada caruurta. Kadibna kashaqeeyey iskuulada.Marka ay dad farabadani ay dhigtaan wax barasho badan oo aad u dheer, waxa markaa ay ku atkaanaysaa xaga shaqo helitaanka ardeydii dhigatay dugsiyada sare.laakinse majiraan manta ardey farbadan oo wax barashadooda sii wadata. Sidaas darteed waxaa suurto galnoqon karta in aad shaqo heshid ka dib marka aad wax barashadaad aad dhameysatid.laakinse wey adagtahay in la saadaliyo suuqa shaqadu sida ay noqon doonto sanadaha nagu soofood leh.